Disability Rights OHIO

# XAASHIDA 5-AAD EE TALOOYINKA U-DOODISTA

MAXAAN SAMAYN KARAA HADDII ILMAHAYGA LA BAAJIYO AMA LA SOO ERYO?

## I. TALLAABADA KOOWAAD: FAHAN SHARCIGALAW

Edbinta ardayda naafada ah waa mid adag.  Waalidiintu waa inay fahmaan dhowr arimood oo guud oo ay la socdaan dugsiga si loo xaqiijiyo in arimahaas la raacayo.

Marka hore: Ardayda leh IEP-yada ayaa laga baajin karaa dugsiga ilaa 10 maalmood sannad-dugsiyeedkii.

> **Talo:** Ka dib marka ardayga la baajiyo 10 maalmood, nidaam qaas ah iyo ilaalino la taaban karo ayaa la dabaqayaa.  Baajinta cunug kujira IEP in ka badan 10 maalmood waxaa loo arkaa "isbeddel meeleyn" oo waa in kooxda IEP ay go'aamiyaan haddii cayrin kale ay habboon tahay.

Marka labaad: Habdhaqanka muujinayo naafonimada waxaa loola dhaqmaa si ka duwan habdhaqanka aan muujinayn.

> **Talo:** Ardayda habdhaqankooda uu muujinayo naafonimadooda si joogto ah loogama baajin karo dugsiga marka laga reebo haddii ay jiraan duruufo gaar ah (daroogo, hub iyo dhaawac jireed oo halis ah).

Marka saddexaad: **Ardayga kujira IEP oo "la cayriyey" waa inuu sii wadaa inuu helo adeegyada IEP** oo uu helaa manhajka guud.  Helitaankani waxa uu ahaan karaa mid ka duwan dugsigii caadiga ahaa.

> **Talo:** Ardayda la cayriyay waxay ku heli doonaan adeegyada meel kale.  Goobta beddelka ahi waa inay ku habboon tahay ardayga oo ay saamaxdaa in ardaygu uu sii wato ka shaqaynta yoolalka IEP-ga.

## II. TALLAABADA LABAAD: XAQIIJI IN DUGSIGU RAACAYO HABRAACYADA

**Codso nuqullada dhammaan diiwaanada la xidhiidha baajinta ama cayrinta.**  Kuwani waxa ku jiri doona warbixinada dhacdooyinka habdhaqanka iyo ogeysiisyada baajinta ama cayrinta.

**Codso kulan IEP ah si aad uga hadasho habdhaqanka.**  Haddii IEP-gu aanu bixinin taageerooyinka habdhaqanka, wax ka beddel IEP-ga si loogu daro adeegyadaas.

**Ka codso dugsiga inuu bixiyo taageerooyinka habdhaqanka.**  Xaqiiji in dugsigu sameeyo qiimaynta habdhaqanka shaqaynaya (functional behavior assessment, FBA) oo uu bixiyo qorshaha faragelinta habdhaqanka (behavior intervention plan, BIP).

**Codso xog iyo warbixinno joogto ah oo ku saabsan habdhaqanka.**  Si qaas ah ula soco habdhaqanka ilmahaaga marka uu dugsiga jooga iyo awooda dugsigu u leeyahay in uu ka jawaabo habdhaqankaas.  Haddii dhibaatooyinku sii socdaan, codso kulan kaloo IEP ah.